



U-diyaargaroga Dhagaysigaaga ODSP

Waxa la Filayo Waxa laga hadlayo

Abril 2016



Hamilton Community Legal Clinic
Clinique juridique communautaire de Hamilton



LEGAL AID ONTARIO
AIDE JURIDIQUE ONTARIO



Tusmada Qoraalka

Qaybta 1 U-diyaargarowga

Dhagaysigaaga

Maxaan u baahanahay inaan cadeeyo?.....	3
Samee xusuus qor.....	3
Ka feker qodobadan.....	4
Su'aalo iyo Tusaalooyin.....	5-9

Qaybta 2 Aadista Dhagaysiga

Aadista dhagaysigaaga	10
Haddii aad daahaysid ama aanad iman Karin...10	
Maxaan u soo qaataa dhagaysiga	11
Yaa halkaa joogi doona?	11
Xilliga Dhagaysiga-Qolka Dhagaysiga	12
Tarjumaanada.....	12
Waxa dhacaya.....	12
Hordhacyada.....	13
Arrimaha Hordhaca.....	13
Codsiyada Dib-u-dhigga.....	13
Caddayn Cusub?.....	13
Ogaysiiska Rafcaanka Xilli Dambe la xereystay?	14
Soo bandhigga kiiskaaga.....	15
Soo koobista kiiskaaga.....	15
Go'aanka.....	15

Qaybta 1 U-diyaargarowga Dhagaysigaaga

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN CADDEEYO? Waxaad u baahan tahay inaad caddayso inaad ahayd “qof naafo ah” taariikhda go’aanka Agaasimaha (taariikhda warqadda u horraysa aad ka heshay ODSP taasi

oo laguugu diiday dheefaha ODSP). Si aad uga hesho taageero dakhli

ODSP, waxa khasab ah inaad buuxiso qeexitaanka ODSP ee “qof naafo ah”. Tani waxay ka dhigan tahay in xirfadle caafimaad oo ansax ah, sida

dhakhtar, uu xaqiijiyo in:

- Aad leedahay dhibaato caafimaad oo jireed ama maskaxeed taasi oo la filayo inay jirto hal sano ama kabadan, iyo
- Dhibaataada caafimaad ee xaddidayso awoodda inaad shaqayso, naftaada daryeesho, ama qabato hawlaha maal-inlaha ah ee guriga ama bulshada.

Sharcigu sidoo kale wuxuu dhigayaa in **dhibaatooyinkaaga caafimaad ay khasab tahay inay yihiin qaar waaweyn oo ay si weyn u xaddidayaana awoodahaaga.**

Maxkamadda Dheefaha Bulshada (SBT) ayaa go’aamin doonta had-dii aad caddaysay kiiskaaga marka la eego caddaynta caafimaad iyo maraggaaga (sida, ka sheekayntaada arrintaada).

MUHIIM: SBT waxa suurogal ah inay leedahay xeerar adadag, sida xeerarka

la xiriira gudbinta caddaynta, iyo ogaysiinta marka hore oo la xiriira maragyada dhagaysigaaga. Fadlan la xiriir rugta sharciga bulshada deegaankaaga si aad uga hesho talo la xiriira xeerarkan.

SAMEE XUSUUS QOR Xusuus qor ka samayso waxyaalaha aad rabto inaad dhahdo. Si kooban ujeedadana abbaaraya, tani waxay kaa caawin doontaa inaad xasuusnaato.

- √ Ha filan inaad awooddo inaad ku akhrido xusuus qorka xilliga dhagaysiga
- √ Arrintani waa qayb soo bandhigid iyo qayb wada-wadahadal ah.
- √ Daacad ahow oo bixi faahfaahin kusaabsan dhibaatooyinkaaga caafimaad
- √ Ha ka gabban inaad sheegtid sida wax u jiraan adiga oo aan buunbuunineyn. Isticmaal waxa dhakharkaagu ku yirii codsigaaga iyo foomamka ODSP-gaaga.

Xasuusnaw:

Waxay noqon inaad ka hadasho xaaladahaaga qiyaastii wakhtiga lagu diiday ODSP;

Tani waa Taariikhda Go'aanka Agaasimaha

(ku qor taariikhda halkan si aad u xasuusato)

*Waxaad xoog saartaa sida xaaladahaagu u saameeyaan awooddaada inaad kaqaybqaadato **bulshada, goobta shqada** iyo **daryeelkaaga shakhsiga**.*

Ka feker qodobadan marka aad xusuus qorka samaynayso:

- Waa maxay astaamuhu?
- Goorma ayey bilaabmeen?
- Meeqa jeer ayaad dareemeysey?
- Sidee ayey u xumaayeen?
- Muddo intee leeg ayey jireen?
- Wali miyaad dareemeysaa?
- Ma aadday cusbitaalka ama gurmada sababtooda darteed?
- Ma isticmaashay wax aalado

wax caawiya ah (tusaale ahaan, bakooraad, dhabar giiji, qurubyada saxanka qubayska, iwm.) Ma dhakh-tarkaaga ayaa kuu qoray?

- Waa maxay daawooyinka aad qaadanaysay Taariikhda Go'aanka Agaasimaha? (Waxa dhici karta inaad soo qaadato waraaqaha daawooyinkaaga 2 sano oo daabacan ee farmasigaaga si aad u muujiso waxa aad hadda qaadanayso iyo inaad joogto u qaadato daawooyinka u qaadato sida laguugu qoro.)
- Haddii aad joojisay qaadashada daawada, u sheeg Xubinta sababta (tusaale ahaan, haddii ay jireen saamayno taban, iwm.)
- Waa maxay dhakhaatiirta aad la kulantay? Kuwo takhasus ah ma aragtay? Meeqa jeer ayaad aragtay? Ma laguugu gudbiyaa takhasusyo kale?
- Sharraxa maalinta kuugu xumayd mar ku dhawayd taariikhda go'aanka Agaasimaha
- Ku qiimee faydaqabkaaga jidheed cabbirka 1 ilaa 10 iyadoo 1 tahay fiican 10 tahay ugu liita.

Su'aalo iyo Tusaalooyin ay dhici kar-
to inay muhiim u yihiin kiiskaaga. **Waxaad isticmaali kartaa sanduuqa sax saarista si aad u calaamadiso waxa kuu muhiim ah una isticmaasho xasuus qorkaaga.**

XASUUSNAW inaad muhimadda saarto saamaynta xaaladaha caafimaad ee uu xaqiijiyey dhakhtarkaagu, maadaama **Maxkamadda Dheefaha Bulshadu ay kaliya tixgelin doonto saamaynta xaaladahaas.**

Xanuunka – Haddii mid kamid ah dhibaatooyinka xanuun la socdo, sii Xubinta woxogaa tafaasiil ah sida:

- Halka dhab ahaantii ku xanuunaysa? Ka bilaw madaxaaga oo hoos u soco ilaa suulasha cagaha.
- Sida uu yahay? Sharrax xanuunka (sida, cabbirka 1 – 10, fiiqan, daran oo degdeg ah, gubanaya...)
- Ma joogtaa? Meeqa jeer ayaad xanuun dareentaa?
- Mararka qaar ma ka sii daraa? Goorma?
- Ma baraarugtaa habeenkii xanuunka dartii?
- Waligaa ma ku ekaatay sariirta/guriga xanuunka dartii?
- Xanuunkaagu ma kasoo raynayey ama ka sii darayey marba marka ka dambaysa?
- Waa maxay gaabisyadaadu xanuunka dartii?
- Miyey cimiladu saamaysaa xanuunkaaga?

Hurdada – Haddii xaaladahaaga caafimaad kugu keenayaan dhibaatooyin hurdada ah, sharrax:

- Waa sidee hurdadaadu?
- Intee ayaad huruddaa intaanad baraarugin?
- Meeqa jeer ayaad habeenkii baraarugtaa?
- Maxaad u baraarugtaa?
- Sidee ayaad dareentaa subaxdii? Nastay ama wali daalan?

Su'aalo iyo Tusaalooyin wali socda

Dhaqdhaqaaqa Haddii aad dhibaato ku qabto dhaqdhaqaaqa, sharrax:

- Lugaynta (Ilaa intee? Kadib maxaa dhaca?)
- Taagnida (Ilaa intee? Kadib maxaa dhaca?)
- Fadhiga (Ilaa intee? Kadib maxaa dhaca?)
- Ka kicista fadhiga, ama fariisiga (Maxaa dhaca?)
- Foororsiga (Ilaa intee? Kadib maxaa dhaca?)
- Fuulista ama ka soo degista Jaranjarta (Imisa tallaabo? Maxaa dhaca?)
- Fidinta gacmaha madaxa dushiisa hortaada

Daryeelka Shakhsi ahaantaada – Haddii aad dhibaatooyin ku qabto daryeelka shakhsi ahaantaada ah, sharrax:

- Cunista
- Nadaafadda iyo isticmaalka mushqusha (feedhista timaha, cadayashada ilkaha, maydhista gacmaha, iwm.)
- Dhar xirashada
- Qubaysiga
- Cunto karinta

Hawlaha guriga

Haddii aad dhibaatooyin ku qabto qabashada hawlaha guriga, sharrax:

- Nadiifinta guriga (dhaqista weelka, nadiifinta dhaska, masaxidda sibidhka, nadiifinta xamaamka, fiiqista (salabayn), giijinta sariiraha, iwm.)
- dhaqid
- cunto diyaarinta

Carruurta – Haddii aad carruur leedahay, sharrax:

- Ma u baahan tahay caawimo xannaanayntooda?
- Geynta iyo ka soo qaadista dugsiya
- Ma awooddaa inaad inaad ka Caawiso shaqada duruusta -guriga loo

Wax kale – Haddii aad dhibaatooyin ku qabto wax ka mid ah waxa soo socda, sharrax:

- Isticmaalka gacmahaaga ama farahaaga (qorista; qaadista waxyaalaha yar-yar, iwm.)
- Qaadisyada shayaasha
- Baabuur kaxaynta ama fuulista gaadiidka dad-waynaha
- Riixista / soo jiididda (tusaale, gari-gacmeedka cuntada dukaanka looga soo iibsado
- Dukaan aadista
- Maaraynta dhaqaalaha shakhsiga ah
- Araga
- Maqalka
- Hadalka
- Xasuusta
- Awood-saarista & digtoonaanta
- Fahamka
- Dhibaato Xallinta
- u dulqaadashada cadaadiska
- Dheellitirnida, Dawakhsanida & Neefsiga
- Wareerka

Caafimaadka Garasho / Niyadeed – Haddii aad dhibaatooyin ku qabto caafimaadka maskaxdaada, sharrax:

- Dareemista murugo (Ma ooyda badanka?)
- Dareemista cadaadis / warwar
- Xaalad niyadjabsan
- Raadka dareenadu ku leeyihiin noloshaada bulsho, awoodda aad ku shaqayso
- Dhuminta xiisaha hawlaha

Su'aalo iyo Tusaalooyin

Caafimaadka Garasho / Niyadeed

Sii Socda

Haddii aad dhibaatooyin ku qabto caafimaadka maskaxdaada, sharrax:

- Ma saamayaa xiriirada aad la leedahay qoyska? Ma leedahay saaxiib?
- Ma darentaa u bogis la'aan aadista meelo kali ahaantaa?
- Ma ku qaadataa wakhtigaaga badankiisa kalinnimo iyo guriga?
- Ma ka warwartaa la kulanka dadka? Ma ka dheeraataa la macaamilka dadka?
- Maxaad naftaada ka aaminsan tahay?
- Maxaad ka aaminsan tahay xaaladahaaga caafimaad?
- Fikrado isdil (qudh iska jar) / wax is-yeelid
- Ilaw badan / Bilaa digtooni (Bixi tusaalayaal)
- Raadaynta dareenada ee himmada cuntada, awood u yeelashada hurdada (hurdo laa'aan, soo jeeda saacado badan)
- Wixii daawooyin aad qaadanayso (tusaale ahaan, kiniinka la dagaalanka niyadjabka ama hurdada) iyo haddii marqaadashadaada la kordhiyey
- Welwel dheeri ah sida walaacista in badan ama ka fekerista in badan dhibaato/dhibaatooyin
- Ma darentaa dhibaatooyin dareen-wad (tusaale ahaan, maqlidda codad, been-arag, dhalanteedyo, iwm.)
- Weerarro argagax leh
- Ku dhibaatood inaad wax abbaartid ama abaabulka macluumaadka
- Maamulid dareenkaaga oo liita, samaynta wax si feker la'aan ah
- Muddada wax abbaartaada oo liidata
- Ku dhibaatood barashada / farsamaynta macluumaadka

Sidoo kale, waxa dhici kara inaad rabto inaad ka hadasho wixii dhibaatooyin aad ku qabto waxa soo socda:

- Ma leedahay hiwaayado ama hawlo aad samayn jirtay kuwaasi oo ay ahayd inaad joojiso?
- Ma jireen isbeddelo noloshaada ama xiriiradaada bulsho beeshaada xaaladahaaga caafimaad dartood?
- Ma aaddaa kaniisadda/macbadka / kiniisadda yuhuudda/ masaajidka sidii barigii aanu caafimaadkaagu xumaan? Haddii ay sidii hore ka yar tahay, sharrax sababta.
- Sidee xaaladahaaga caafimaad u saameeyaan niyad ahaan?
- Ma leedahay saamayno taban ama dhibaatooyin kale daawooyinkaaga dartood?
- Waa maxay daawaynaha aad martay? Wax ma kuu tareen?
- Ma tagtay fisiyoterabi? Muddo intee leeg? Meeqa jeer? Wax ma kuu taray?
- Ma jiraan daawayno la soojeediyey laakiin aad awoodi wayday inaad gadato?
- Ma leedahay balwado? Ma la qabatintay walxo sida daroogo ama khamro? (Balwadaha waxa loo tixgaliyaa si la mid ah sida xaaladaha kale)
- Wax dhibaatooyin ah ma ku qabtaa la ciyaarista carruurtaada ama aadista meelaha sida jardiinada?

OGOW: _____

OGOW: _____

Qaybta 2

Aadista Dhagaysiga

Taariikhda Dhagaysiga he

Waxa muhiim ah inaad aaddo dhagaysiga. Taariikhda iyo wakhtigu wuxuu ku yaalaa Ogaysiiska Dhagaysigaaga ee boosta lagu soo dhigay. Haddii aanad rabin inaad aaddo dhagaysiga, dhagaysigu waxa dhici karta inuu iska bilaabmo sidii loo qorsheeyey adiguna waxa aad waayi fursadda aad kiiskaaga ku soo bandhigayso (warkaaga ku sheegayso). Haddii ay dhacdo inaad iman weydo oo aanad hayn sabab macquul ah, waxa dhici karta inaad dhumiso rafcaankaaga, oo aad awoodi waydo inaad ka fayl garaysato rafcaan Maxkamadda Dheefaha Bulshada (SBT) muddo 2 sano ah. Xaalado gaar ah dartood, waxa dhici karta inaad gudbiso codsi dib-u-dhig dhagaysigaaga.

Maalinta dhagaysigaaga dhacayo, waa inaad timaaddaa meesha adiga oo soo hormaraya. Diyaar u ahow inaad sugto Xubinta SBT inay kuu soo wacdo dhagaysigaaga. Haddii aad daahdo, SBT waxay tuuri kartaa rafcaankaaga. Waxa **khassab ah** inaad qof ahaan timaaddo dhagaysigaaga Maxkamadda Dheefaha Bulshada (SBT).

Muhiim

Haddii aad daahayso ama aadan soo iman karin dhagaysigaaga sababo gaar ah dartood, waxa **KHASAB AH** inaad soo wacdo SBT isla markaaba. Waxa dhici karta inay awoodaan inay kuu sameeyaan qabanqaabo. Lambarka taleefanka lacagta la'aanta ah ee Maxkamadda Dheefaha Bulshadu waa: **1-888-256-6758**

Wakhtiga

Dhagaysiga waxa la muddeeyey 1 ilaa 1.5 saac, mararka qaar kood waa ka dheeraan karaa. Mararna waxay qaadaneysaa 30 ilaa 45 daqiiqo. Waxa suurogal ah inuu wakhti dheeri ah ay qaato haddii aad haysato tarjumaan kuu turjumaya..

Maxaan u soo qaataa dhagaysiga

Aad ayey muhiim u tahay inaad soo qaadato Waraaqahaaga oo DHAN dhagaysiga. Fadlan meel isku hay waraaqahaaga uu bixiyey adeegga sharcigu.

Fadlan soo qaado:

- Ogaysiiska Dhagaysiga
- Dhammaan dokumentiyada, warbixinaha caafimaad iyo warbixinaha loo gudbiyey Maxkamadda Dheefaha Bulshada (SBT) iyo Qaybta Go'aanada Naafonimada ee ODSP (mararka qaar loo tixraaco DAU) kahor dhagaysigaaga. Soo qaado waraaqaha daawada lagu qoray oo daabacan iyo daawooyinkaaga wakhtigan oo dhalooyinka kujira.
- Gudbinaha waraaqaha ee Agaasimaha Barnaamijka Taa-geerada Naafada Ontario.
- Xusuus qorkaaga waxa aad rabto inaad xasuusnaato si aad ugu sheegto Maxkamadda Dheefaha Bulshada.

Haddii rafcaankaaga la gudbiyey xilli dambe, fadlan soo qaado wixii caddayn taageero ah taasi oo sharxaysa sababta aadan u fayl garaysan karayn rafcaankaaga wakhtiga loogu talagalay (*Fadlan ka fiiri qaybta "Arrimaha Hordhaca ah" ee bogga 13 macluumaad dheeraad ah*).

Ayaa halkaa joogi doona?

- Sida badan SBT waxay dirtaa Xubin Maxkamadda ka tirsan si ay go'aan uga qaadato kiiskaaga.
- Qaybta Go'aanka Naafonimada ee ODSP waxa sidoo kale dhici karta inay cid u dirto dhagaysigaaga si ay ugu doodaan in aadan mutaysan dheefaha ODSP.
- Xubintu sida badan waxay kuu oggolaan doontaa inaad wadato xubin qoys, saaxiib ama qof ku taageeraya dhagaysigaaga si ay kuu taageerto niyad ahaan. Haddii xubinta SBT kuu oggolaato in saaxiib ama qaraabo kula joogo dhagaysiga oo dhan, qofkaasi lama oggola inuu la hadlo ama caddayn si-iyu SBT. **Haddii aad rabto cid caddayn bixisa, ha noqdo marag,** waxa aad u baahan doontaa inaad raacdo xeerarka SBT (fiiri bogga 3 ee hagahan lana xiriir adeegga sharciga). Maraggaagu waxay noqon inuu ku sugo dibadda qolka dhagaysiga ilaa ay noqoto wakhtigii la bixinayey caddaynta.

Xilliga DHAGAYSIGA

Qolka Dhagaysiga

Dhagaysi Maxkamadda Dheefaha Bulshadu (SBT) wuxuu ka dhacaa qolka lagu qoray Ogaysiiskii Dhagaysigaaga. Qolka dhagaysiga, waxa yaala miis oo qof kastaana dhinac ka soo fadhiiyaa. Qolka dhagaysigu ma aha mid caadi ah sida maxkamadda. Wuxuu u eg yahay xafiiska shirka madaxda. Dhagaysi waa sir. Haddii uu tarjumaan joogo qofkaasi (tarjumaanka) waxa laga rabaa inuu wax kasta oo dhagaysiga la yiraahdo uu ku ilaaliyo qarsoodi iyo sir.

Tarjumaanada

Dhagaysiga SBT horteeda waxa lagu sameeyaa Ingiriisi iyo Faransiis. Haddii aadan ku hadal oo aadan fahmin Ingiriisida ama Faransiiska, waxa khasab ah inaad haysato tarjumaan waqtiga dhagaysiga. Marka aad fayl garaysato rafcaankaaga waa inaad codsato tarjumaan luuqadda aad ku hadasho, kadibna SBT waxay kuu qabanqaabin adeegyada tarjumaanka.

Maxaa Dhaci Doona

Waxa aad ka hadli doontaa oo laguna waydiin su'aalo kusaabsan xaaladaha caafimaad ee dhakhtarkaagu taxay inay muhiim yihiin. Su'aalaha waxa lagu waydiin inaad sharraxdo sida ay kuu saameeyaan nolol maalmeedkaaga.

Maxkamaddu (SBT) waxay awood u leedahay inay beddeho go'aanka laguugu diidayo dheefaha ODSP. Maxkamaddu waa inay ka jawaabto su'aasha: Qofkan xaq ma u leeyahay ODSP taariikhda Wasiiraddu dhahday "maya."

Su'aalaha waxa waydiinaya Xubin ka tirsan Maxkamadda Dheefaha Bulshada taasi oo go'aamin doonta inaad buuxisay shuruudaha sharciga ah si aad u hesho dheefaha ODSP halka Wasaaraddu ku dhahday ma aadan buuxin. *Uma* baahnid inaad tusto in aadan shaqayn karin habayaraatee. Shuruudaha sharciga ah waa "Si weyn" ma aha "daran." Xubinta Maxkamaddu waxay rabtaa inay maqasho dhibaatooyinkaaga hawlaha nolol maalmeedka: **Daryeelka shakhsiga ah, kaqaybgalka beesha iyo goobta shaqada.**

Hordhacyada

Bilawga dhagaysiga, xubinta SBT way iskaa bari waxayna waydiin magacyada dhammaan dadka jooga dhagaysiga. Xubinta SBT waxay si kooban u sharxi sida dhagaysigu u socon doono. Xubinta SBT waxay xaqiijin cinwaanka boosta halka ay ka diri doonaan go'aanka kusaabsan rafcaankaaga.

Marka xiga, Xubinta SBT waxa dhici karta inay ku siiso sharrax kooban doorka SBT kaas oo ka madaxbannaan ODSP. Xubinta SBT waxay hubin doontaa inay hayaan dhammaan dokumentiyada adiga iyo ODSP aad u soo dirteen SBT.

Arrimaha Hordhaca ah

Marka xiga Xubinta SBT waxay qaban wixii “**arrimo hordhaca ah**” ka hor dhagaysiga kiiskaaga. Tusaalayaasha qaar arrimaha hordhaca ah waa codsiyada dib-u-dhigga, caddayn cusub, fayl garaysiga xilli dambe ee Ogaysiiska Rafcaanka, ama diidmooyinka ODSP ee caddaynta caafimaad.

Codsiyada Dib-u-dhigga

Codsiyada dib-u-dhigga inta badan waxa la samayn karaa ka hor taariikhda dhagaysiga. (La xirii xafiiskayaga haddii aad u baahan tahay talo dheeraad ah oo kusaabsan codsashada dib-u-dhigga). Waxa dhici karta inaad codsato dib-u-dhig haddii aad hayso sabab aad u fiican ee aadan fulin karayn taariikhda dhagaysiga. Dib-u-dhigyada waxa la bixin karaa duruufo gaar ah oo kaliya. Dhagaysiyada dib loo muddayn maayo iyadoo sababtu tahay dib-u-dhacyo ku yimi raadinta kaalmo sharci, ama si qofku u helo warbixino caafimaad oo kale. Haddii dib-u-dhigga la diido, dhagaysigu waa bilaabi.

Caddayn Cusub Ma Jirtaa?

Haddii aad hayso **dokumentiyada caafimaad** kuwaasi oo aad awoodi wayday inaad ku gudbiso 30 maalmood ka hor dhagaysiga, waa inaad hesho talo sharci ka hor inta aadan gudbin dokumentiyadaas. Haddii talo lagugu siiyey inaad sidaan yeesho, waa inaad u soo qaaddo laba nuqul oo dheeraad ah dokumentiyada, Maxkamadda iyo DAU/ODSP, hadday joogaan. Xubintu waxay kadib go'aansan doontaa haddii ay dib-u-eegi doonaan caddaynta caafimaad ee kale. Sharrax sababta aad dhakhso ugu heli wayday warbixinaha caafimaad.

Xilliga DHAGAYSIGA

Sii Socda

Ogaysiiska Rafcaanka la Fayl Garaystay Xilli Dambe?

SBT ma aha inay dhagaysato kiiskaaga haddii aad seegto 30 maalmood ee lagu qabtay inaad ku gudbisno rafcaankaaga, laakiin waxa dhici karta inay ku siiyaan **kordhin** haddii aad sheegto sababo fiican. Waxa lagu waydiisanayaa SBT inay maqasho kiiskaaga xiitaa haddii leedahay **rafcaan xilli dambe** (kadib 30 maalmood ee wakhtiga kama-dambaysta ah ee warqaddaada go'aanka Dib-u-eegista Gudaha).

U sheeg Xubinta SBT in aadan gudbin Karayn rafcaankaaga wakhtiga loogu talagalay sababo "**ka baxsan awooddayda**", sida:

- Maad helin warqadda go'aanka. Ama waxa aad heshay warqadda go'aanka xilli dambe.
- Waad heshay go'aanka, laakiin waxa aad dhib aad kala kulantay: luuqadda, akhriska, waxa aad dhib kala kulantay fahamka habka rafcaanka.
- Waxa aad la kulantay dhibaato sababo la xidhiidha naafonimadaada. Waxa aad jeclaan lahayd fududayn naafonimo sida uu dhigayo *Xeerka Xuquuqda Aadanuhu*.
- Gurmada shakhsi ah ama sababo naxariiseed.

U sheeg Xubinta SBT inaad had iyo jeer ku talogashay inaad rafcaan ka qaadata go'aanada diidmada ee ODSP-gaaga, haddii arrintu sidaas tahay. Keen caddayn si aad ugu taageerto codsigaaga kordhinta (tusaale ahaan, caddaynta cusbitaal dhigista haddii aad xanuusaneysey markii go'aanka la soo diray). Ama haddii aad qabto dhibaatooyin xagga xasuusta ah oo saameeyey awooddaada inaad gudbisno rafcaankaaga wakhtiga loogu talagalay, waxa dhici karto inaad dhiibto xusuus qor caafimaad.

Xubinta SBT waxay ka qaadan go'aan haddii la oggolaanayo kordhin. Haddii la oggolaado, waxa aad u gudbi doontaa qaybta muhiimka ah ee dhagaysiga.

Gudagalka Kiiskaaga

Kadib arrimaha hordhaca ah, Xubinta SBT waxay rabi doontaa inay dhagaysato adiga iyo maragyadaada. Waxa lagu waydiin inaad ballanqaaddo inaad runta sheegto.

Qaybta muhiimka ah ee dhagaysigu waxay ku lug yeelan doontaa caddayn kusaabsan xaaladahaaga caafimaad iyo li-idashooyinka (astaamaha) iyo sida ay kuu saameeyaan nolol maalmeedka. Tani waa fursaddaada aad kaga hadlayso mid kasta oo kamid ah xaaladahaaga caafimaad, sida ay u halis badan yihiin (ama u weyn yihiin), iyo raadka xaaladahaagu ku leeyihiin hawlahaaga maalinlaha ah.

Kadib marka aad dhammaysto bixinta caddayntaada, waxa dhici karta in lagu waydiiyo su'aalo dheeraad ah. Haddii Sarkaalka Soojeedinaya Kiisku uu ka joogo Qaybta Go'aanka Naafonimada (DAU/ODSP), waxa sidoo kale dhici karta inuu ku waydiiyo su'aalo.

Haddii aad fahmi waydo su'aal, u sheeg Xubinta SBT taasi oo isku-dayi doonta inay kaa caawiso inaad fahamto. Haddii aanad garanayn jawaabta, u sheeg Xubinta SBT inaanad garanayn. Waxba ma leh haddii ay wakhti kugu qaadato inaad ka fekerto jawaabtaada.

Soo Koobista Kiiskaaga Dhammaadka Dhagaysiga

Ka hor dhammaadka dhagaysiga, waxa aad fursad u heli doontaa inaad soo koobto kiiskaaga oo aad si kooban ugu sheegto Xubinta SBT sababta aad ugu haysato inaad tahay qof naafo ah. Haddii aad ku haysato 'Barnaamijka Kaalmada Qofku Caawinayo Naftiisa ee la Hagayo' Hamilton Community Legal Clinic, Waxa aad helaysaa "Gudbinta Rafcaan-qaataha" kaasi oo aad tixraaci karto marka aad soo koobayso amase aad waydiisan karto Xubinta SBT inay akhrido mar dambe taa beddelkeeda. Marka aad dhammayso soo koobistaada (ama haddii aad doorato in aadan samayn soo koobis), wakiilka ka socda DAU (ODSP) (haddii uu joogo) ayaa sidoo kale fursad u yeelan doona inuu soo kobo oo uu dhaho sababta DAU (ODSP) ugu malaynayso inaanad ahayn qof naafo ah.

Go'aanka

Maxkamadda Dheefaha Bulshadu ma bixiso go'aankeeda dhagaysiga isla markaaba. Xubinta Maxkamaddu waxay dib-ueegtaa caddaynta kadib dhagaysiga waxayna soosaartaa go'aan qoran. Nuqul go'aanka ah ayaa lagu soo dhigi doonaa boosta, sida badan 60 maalmood gudahood.

Fadlan la xidhiidh xafiiskayaga marka aad hesho go'aankayaga

Buug-gacmeedkan waxa loogu talagalay in loo isticmaalo kaqayb ahaan habka Is-caawinta Qofka ee la Hagay ee ODSP iyo marka lagu daro fiidyowga “Isku Diyaarinta Maxkamadda Dheefaha Bulshada”.

Fiidyowga

“Isku Diyaarinta Maxkamadda Dheefaha Bulshada” waxa laga heli karaa

www.hamiltonjustice.ca

(Booqo “Our Legal Services”, kadib “Ontario Disability Support Program”) ama la xiriir:

Hamilton Community Legal Clinic

Buug-gacmeedkan waxa lagu heli karaa luuqado kale. Fadlan la xiriir Hamilton Community Legal Clinic si aad uga



Daabacay:



Hamilton Community Legal Clinic
Clinique juridique communautaire de Hamilton

**100 Main Street East, Suite 203
Hamilton, ON L8N 3W4**

**Taleefanka: 905-527-4572 Fakaska: 905-523-7282
www.hamiltonjustice.ca**